**Ref: PDF/01424** **Date: April 1, 24**

[**www.puntlanddiaspora.org**](http://www.puntlanddiaspora.org) [**mediarelations@puntlanddiaspora.org**](mailto:mediarelations@puntlanddiaspora.org)

Puntland Diaspora Forum waxa ay si adag uga horjeedaa wax ka badalka dastuurka oo ay sida degrdegga ah u meel mariyeen Barlamaanka Federalka.

Talabaadan halka dhinac ka raran uu ku dhaqaaqay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa si bareer ah u bedelay Dastuurka isagoo aan tixgalin qodobbada muhiimka ah ee lagu qeexay dastuurkii KMG ahaa ee ay Soomaaliya ku heshiisay 2012-kii, taasi oo khatar weyn ku ah isu-dheellitirnaanta awood-qaybsiga ee qaranka, wiiqaysana mabaadi'da aasaasiga ah ee dimuqraadiyadda iyo in cidwalba iska dhexaragto.

Inkastoo Puntland ay ku baaqday wadatashiyo ballaaran, haddana Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu sii watay ajandayaashiisa, isagoo diiday in uu dhagaysto aragtiyada ka duwan. Waxa uu adeegsaday xeelado ka baxsan anshaxa sida laaluushka iyo ballan-qaadka xilalka wasiirnimo si ay saameyn ugu yeeshaan codadka xubnaha baarlamaanka waxay arinkaasi wiiqday geeddi-socodka dimuqraadiyadda, waxayna meesha ka saaraysaa kalsoonida ay shacabku ku qabaan xukuumadda.

Daah-furnaan la'aanta iyo la-tashiyada ku xeeran wax-ka-beddelladan ayaa shaki weyn gelinaya hufnaanta geeddi-socodka dimuqraadiyadda. Puntland oo ka mid ah maamul goboleedyada ugu ugu dhulka balaaran Somaaliya iyo Somaliland oo sheegata inay ka go'day Soomaaliya ayaa si wada jir ah u koobaysa in ka badan kala badh masaaxada dhulka qaranka Somaaliya. Goobaha harsan oo inta badan ay gacanta ku hayaan kooxda Al-Shabaab, ayaa waxay ay su'aal galinaysaa sharcinimada madaxweynaha in uu yahay hoggaamiyo Soomaaliya oo mid ah.

Habkan kala qaybsanaantu wuxuu uga sii daraysaa xiisadaha jira, wuxuuna wiiqayaa dadaalada dib-u-heshiisiinta iyo midnimada qaranka. Walaaca gaarka ah ayaa ah in lagu soo daro qodobka siinaya madaxweynaha awood aan lagu

hubinkarin inuu xilka ka qaadi karo Ra'iisul Wasaaraha iyadoo aan la marin habraaca baarlamaanka, taasoo ka dhigan burbur halis ah oo ku yimaad dimoqraadiyada iyo hababka isla xisaabtanka.

Daneeyayaasha ka soo kala jeeda siyaasadaha kala duwan, oo ay ku jiraan madaxweynayaashii hore iyo wakiilada bulshada rayidka ah, ayaa si adag uga soo horjeeda isbedeladaan dastuuriga ah. Waxay ka digayaan in wax ka beddelka noocaas ahi uu carqaladeeyo horumarka laga gaadhay dhismaha dawladnimada, isla markaana uu caqabad ku noqon doono awoodda uu dalku u leeyahay inuu ka bogsado aafooyinkii dagaallada sokeeye. Iyadoo laga jawaabayo arrimahaas, ururka qurba-joogta Puntland wuxuu ku baaqayaa in la qaado tallaabo degdeg ah oo wax looga qabanayo xaaladda, lana ilaaliyo mabaadi'da dimoqraadiyadda, isku-dhafka, iyo ixtiraamka hannaanka dastuuriga ah. Marka la eego culayska ay leedahay duruufaha jira, ururka qurba-joogta Puntland wuxuu si buuxda u taageersan yahay in Puntland ay kala laabato aqoonsiga madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud inuu aanu ahayn maxwayne soomaaliyeed.